Hadaba bacteria da in teeda ku hadha afku waxa ay bilaabaysaa inay soo dayso acids habeenka oodhan,acid taas oo bur bur u horseeda ilkaha .si aad burburkaas ajoojiso amaba uyaraso waxyeeladiisa waa inaad ugu horaynba cadaytaa

subuxii isla marka aad toost Si doo kale hadii aad qaadato daawooyin saameyn ku leh in afku qalalo ama qandhuuftu yaraato,

waxa wanaagsan inaad isticmaasho xanjo macaanku ku yaryahay,sideedaba xanjadu waxa ay kordhiusaa huuufta ,waxa kale oo muhiim ah inaad isticmaasho cabitaan badansi afkaagu u qoyanaado ,waxaanad ogaataa markasta oo afkaaga ay qandhuuftu ku yaraato inaad unugu shahay suus ku dhaca ilka haaga

Ka hortaga samaysanka TARTAR

TARTAR waa walax adag oo

samaysanta marka ay huraadu aad u adkaato amaba waxaan waxaan odhan karnaa waa heerka ugu sareeya ee ay noqoto huraadu(plaque-calculus-tartar).

Nasiib daro TARTAR ma ahin shey uu cadygu gooyo ama ka saari karo meesha ,sida kaliya ee aad uga takha lusi kartaayi na waxay tahy adiga oo utaga dhakhtarkaaga ilkaha si aw u nafiyo ugana sifeeyo ilkaha dushooda iyo dhexdooda iyo xataa meelaha ay hoosta kaga jirto ciridka.

Dayacnaan kasta oo aad samaysaa waxay keenaysaa in ay sababto xanuuno ku dhaca ciridka oo dhibaato iyo ilka beel baahsan kukeenta qofka .ka hortaga ayaa ka fiican daaweynta:inaga oo ka duulayna odhaahdan caafimaad,waa inaad xidhiidh joogta ah la yeelataa dhakhtarka ilkaha(dentist),sidoo kale waa inaad cadayataa laba jeer adoo isticmaalaya dawada lagu cadaydo si ay meesha uga baxdo samaysanka iyo ururitaanka tartar iyo huraadu .

Daka qaba kaadi sonko-roowga,kuwa caba sigaarka iyo dadka iyo ku wa ay qand-

huuftu af kooga ku yartahay-ba waxay khatar ama halis uyihiin samasanka TAR-TAR(waste results from bacteria).

Ilaalinta ciridkaShaqada cadaygu kuma koobna ooqudha inaad bacteriada ka saarto ilkaha ,balse waxa ay ukeentaa afka inuu yeesho ur ama caraf fiican oo aan laga didi Karin balse la jeclaysto sidoo kale ilko qurxoon oo dhaladhalaaya Waxaad ogaataa in caafimaadka guud ee afka oo wanaagsanada . ayna ku koobnayn ilkaha oo kaliya.ciridku ayaa muhiimad balaadhan u leh caafimaadka iyo fayd qabk a guud ahaan afka,hadaba hadii aanad ka warhayn ama aanad illaalin caafimaadka ciridka waxaad si fudud oo aan la filanayn uwaayi doontaa ilkahaagaSidaa sila mid ah hadii uu xumaado caafimaadka ciridku waxa aw

seedaacuduro halis ah bsida periodontal diseases ,in qofku yeesho afeef sida marka uu isticmaalayo qabaw,kulaylka iyo xataa hadii uu afka kala fu-ro ,iyo ugu danbayn ilka la aan aan la daawayn Karin (irreversible teethloss)Si dhibaa-tadaa s oodhan looga badbaado waa inaad cadyataa laba jeer maalinkasta ,aad findhici-lataa,sidoo kale aad is

ticmaashaa antibiotic mouth-wash,aanad xidhiidh joogta ah layeelataa dhakhtarka ilkaha (dentist).

Hadii aan talaabooyinka aan sheegnay la isticmaalin qoffka waxa kaliya ee wax loogu qabankaraa waa in dawooyin badan la siiyo ugu danbayna qaliin lagu sameeyo(periodontal surgery).

Mahamoud ismaail aadam
(fourth year dental student) in
amoud school of dental medi-
cine

Ugu horeyn waxaa mahada tan gaara iyo tan guud iska leh ilaaha suura galiya wax waloo suro gala, intaa ka dib akhriste waxaan kugu salaamayaa salaanta islaam السلام عليكم ورحمة الله وبركاته
Waxaa mahadnaqa usoo jeedinayaa mahad aan la soo koobi karin intii maqaalada soo dirtay oo leh qaar maqaaladoodii la soo qoray iyo qaar kaleba runtii waan u mahadnaqaya inta aan imika ay u suuro galin inay ku so baxaana insha'alaha waxaan u balanqaadaynaa inay kuwa danbe ku soo bixi doonaan Waxaan sidoo kale si balaadhan u salaamayaa una mahadnaqayaa dhamaan inta ka qayb qaaddatay majaladani inay hirgasho oo ay kow ka yihiin xubnaha ururka Baxnaano Youth Organization oo uu horkacayo gudoomiyaha Ururka Mustafe Muumin Iyo dhamaan qaybta warbaahinta Ururka ee hoos ku xusan :

- 1-
- 2
- 3-
- 4-
- 5-

Abdulahi Nour Hussein
Himilo News Letter Aditor
Irbid - Jordan



Faa'idooyinka



Macsarada waa sali-id aad u qaali ah lehne faaidooyin qolfoofidda xididada, caafimaad oo aan la soo waxayna furtaa xidada xinni-koobi karin. Saliid ban ee wadnaha. 8- Macsarada macsarada waxaa la istic-waxay jilcisaa caloosha la-maali jiray kumanaan guna daaweeyaa saxaro-sano ka hor oo hindida adeegga. 9- Macsarada waxay daawo u isticmaali jireen daawo tahay wareerka iyo aragtida lagu daaweeyo cudurro daciifka ah. badan waxaana loo ya- 10- Macsarada waxaa lagu qaannaa saliid macsarada daaweeyaa xasaasiyadda iyo "Queen of Oils" oo ah cuncunka jirka macnaheedu "Boqoraddii 11- Macsarada waxaa lagu Saliidaha" waxayna mag-daaweeyaa kacsanaanta iyo acaas ku mutaysatay qii-isku-buuqa maskaxda. maheeda caafimaad iyo 12- Macsarada waxay nafaqo cunnno ahaanteedaba. u tahay korriinka tinta wayna Saliid macsarada waxaa dheereysaa. wadankeenna laga istic- 13- Macsarada waxay oogada maali jiray muddo fog ka ilaalisaa ileyska iyo ku-iyadoo loo adeegsan jiray leeylka qoraxda. shiididdeeda Geela. 14- Macsarada waxay daawo Haddii aan isku dayo in u tahay xanuunka cadada iya-aan ka hadlo faaidooyinka doo la mariyo caloosha qeybta ugu caansan ee leedahay xudunta ka hooseyso xilliga iyo cudurrada lagu caadada. 15- Macsarada daaweeyo ayaa waxaa ka waxay yaraysaa qalleelka iyo mid ah: xanuunka haweenka dhalmo- 1- Macsaradu waa saliid deyska ah iyadoo saxaaxa la-cunnada loo isticmaalo gu subko. lehne caraf udgoon. 16- Waxaa saliidda macsarada 2- Macsarada waxay ka ku jira borotiinno aad u badan hortagtaa cudurka kan- oo ku filnaan karo qofka had-sarka maadaama ay tahay dii cunto ka dhigto. "Antioxidant" awood leh. 17- Waxaa macsarada ku jiro 3- Waxaa macsarada ku dufanta kordhiso xasuusta iyo

jiro ugu yaraan 7 maaddo oo xifdinta.

18- Waxaa macsarada ku xanuun baabi'iye ah. 4- Macsarada waxaa lagu jiro fitamiinka "E" kaasoo daaweeyaa diiqada, welwelka firfircooniya wareegga dhi- iyo hurdo la'aanta. igga. 5- Macsarada waxaa lagu daaweeyaa Yiridka iyo cudur- rada ku dhaco afka. 6- Macsarada waxay daawo u tahay kolestaroolka kacsan. 7- Macsarada waxay joojisaa maalo daliigidda maadaama maqaarka jirka ay si sahlan uga gudubto. 21- Macsarada waa daawada ugu fiican xanuunka loo ya- qaanno "Sciatica" oo ah xanuun neerfaha "Sciatic" oo keeno dhabar xanuun iyo lug xanuun aad u daran. 22- Macsarada waxay ka qeyb qaadataa kontoroollida cadaadiska dhiigga. 23- Macsarada waxay daawo u tahay Baabasiirta, qofkii macsaro joogteeyane baabasiir isma arkaan waa sida la xaqiijiyay. 24- Macsarada maahan sali- idaha kiciyo Gaaska ama laabjeexa keeno. 25- Saliidda macsarada waxay raagi kartaa muddo dheer iyadoo isbadalin maadaama ay ku jirto maaddo la dagaallanto bak- teeriyada iyo caabuqa 26- Macsarada waxay daawo u tahay caabuqa sanqada "Sinusitis" oo hal dhibic oo sanku lagu dhibciyo ayaa ku filan. 27- Macsarada oo lagu luqluqo subax kasto waxay ka hortagtaa caabuqa Quumanka iyo Cuno-xanuunka.

28- Macsarada waxay daawo loo bogay u tahay Kala-goysyo xanuunka. 29- Macsarada waxaa lagu daaweeyaa cudurka "Athletes Foot" oo ah caabuuq fangas oo ku dhaca faraha cagta dhexdooda oo u badan Orodada iyo Ciyaartoyda. 30- Macsarada waxaa lagu daaweeyaa faruuruca ay keento xafaayadaha loo xiro caruurta. 31- Macsarada oo ilmaha iskuulka aado loo mariyo sanku waxay ka ilaalisaa hargabka, ifilada iyo sanboorka ay ka qaadi karaan caruurta kale. 32- Macsarada waxaa lagu daaweeyaa Goon-jabka iyo madax xanuunka noocya- diisa kala duwan iyadoo madaxa lagu xirto. 33- Macsarada oo la qiiqsado ama la isku huuri- yo waxay daawo u tahay neefta iyo caburnaanta marinnaada hawada.

Prepared by:

muxiyadiin

xuseen xasan.

Email: muxiyadiin12

@hotmail.com



Ururka baxnaano qaybta wacyi- galintu waxay idin leedahay aad ayaad ugu mahadsantahay akhriste akhrinta aad akhriinayso majaladan. Waxaan rajayna- yaa inaad noogu soo dirto email- ka wixii talo ah iyo tusaaloba Himilo012@hotmail.com mahadsanid..

**Taxanaha Wargayska Himilo..
Waa Mawduucyo Joogta Ah**

Aduunyadu waa tartan ee noqo sida Harahan si aad uguulaysato ood ugaadho hadafkaaga



Hodan Abdi Ibraahim

Sheekada Koowaad(1)

Maalin maal maha kamida ayaa looqabtay tartan aad uba-

**Dunidu Qiimo
Ma Leedahaya**



**Mohamed Ahmed Abdilaahi
Boqore
(Mahamed Cashiiiiiib)**

Dunidu qiimo ma yeelato hadduuna qofku lahayn saaxiib wanaagsan. Qof walbana wuxuu jecel yahay inuu lahaado saaxiib wanaagsan. Waayo Saaxiibka wanaagsan waa wehelka ugu qaalisan dunida. Boqore ahaan waxaan u

waxay kutartamayeen fuulitaanka buurta uugu caarada dheer, waxaa kasoo qayb galay wixii jiray hare si ay u daawadaan ciyaarta tartanka harayaasha, iyaga oo dhamaantood xamaasadaysan sugayana cida ku guulaysata tartanka fuulitaanka buurta.. waxyar kadib markay soo buuxsantay goobtii tartanku ayna gaadhay wakhtiguu bilaamayay tartanku ayaa siidhi hayihii sheegay inuu bilaamayo tartanku.. dhamaan waxay istaageen saf tartamayaashii waxaa loo garaacay saacadii inay bilaamatay tartanku..... midkasta oo kamida tartamayaashii wuxuu bilaabay

baxay safar dheer sannado ka hor. Runtii safarkaas muu ahayn ku magaalada Borama ka baxsan, mana ahayn ku cilmi korodhsi ah. Talow muxuu ahaa? Waa su'aal da' wayn oo madaxa daalinaysa. Ujeedada safarkaygu waxay ahayd inaan helo saaxiib wanaagsan. Safarkaygii waan ku guulaystay oo waxaan ogaaday in saaxiibka ugu wanaagsan uu yahay inanka aan jaarka nahay. Isaga ayaan la ciyaari jiray oo mar walba la joogi jiray. Laakiin aakhirikii wuxuu u guuray caasimadda Hargeysa. Markaas ayaan naftayda ku yidhi: "Saaxiibka wanaagsan maaha ka noqda Offline; yacni maaha ka guura". Haddana safarkii dheeraa ayaan mar labaad u baxay si aan u

inuu degdeg ufuulo buurtii isagoo doonaya inuu noqdo ka guulaysta..waxay bilaa-been daawada yaashiina inay sacabka ugaracaan iyagoo isku dayaya inay dhiiri galiyaan, tartankuna aad ayuu uxamaasad badnaa, waxaa kamid ahaa ereyada ay lahaayeen daawda yaashu (hebel dedeg... hebel gor usoco... hebel aadaa guusha le...) hase ahaatee kolba mida ayaa soo dhacayay oo ku guul daraysanayay daawada yaashuna aad ayay u dhawaaqayeen... ugudanbayntii dhamaantood way soo wada daateen ilaa mid qudha mooyaane... wuu socday oo wuu sii koray buurtii ilaa uu gaadhay bartii u saraysay.. waxaa yaabay daawda yaashii iyo wariyayaashii dhamaan wixii meesha

oo dhan ayaa mar qudha is waydiinayay siduu ku gaadhay buurta dhaladeeda iyadoo saaxiibadii oo dhani ay una dhawaan waayeen?... waxay la isku dayay in lala yeesho waraysi si loo ogaado sirta kadanbaysay inuu noqdo harihii uugu horeeyay eek u guulaysayta tartan noocanoo kale ah, waxaa la ogaaday inuu harahani DHEGALAYA AY oo marna muu maqlayn waxay ku dhawaaqayeen daawada yaashu.. bes waxaa umuuqday uun hadafkiisa!!!!

Waxaa lagaa rabaa inaad ka dhega la aatid dhamaan hadalada dadka iyo asxaabtaada markaad doonaysid inaad kaqiijsid hadaf...kaliya xasuusnaw inaad ilaahay tala saaratid markata maxaayeelay alaah wuxuu yidhi ((فإذا عزمتم فتوكل على الله...))

**Qoraalkii :
hadan abdi ibraahim**

odhanayay "Thomas Adison" inuu 999 oo jeer ku fashilmay inuu laydhka soo saaro laakiin uu aakhirikii ku guulaystay.

Alxamdulillah, aakhirikii waxaan helay saaxiibkii ugu wanaagsanaa ee noloshayda soo mara. Maalinkasta waan sii jeclaadaa waayo igama guuro, igama dhoofa, igama cadhoodo, ima naco, offline igama noqdo. Waliba markasta wax fiican ayuu ii sheegaa oo cilmigayga ayuu sii kordhiyaa. Waa saaxiib cashiiiiiib ah oo marwalba Online ah oo aan offline marnaba iga noqon. Magaca saaxiibkayga wanaagsan waa "Wax akhriska".

Aduunkana laguma arag qof ay saaxiibo noqdeen "Wax akhriska" oo khasaaray **Maxamed Ahmed Abdilaahi**

helo saaxiib wanaagsan. Waxaan ogaaday in saaxiibka ugu wanaagsan uu yahay ardayga aan isku fasalka nahay. Isaga ayaan wax la dhigan jiray oo la joog joogi jiray marwalba. Laakiin aakhirikii wuxuu u dhoofay jaamacad ku taalla dibadaha. Markaas ayaan naftayda ku yidhi: "Saaxiibka wanaagsan maaha ka noqda Offline; yacni maaha ka dhoofa". Waar safarku dheeraa... ax... ax... maxaan u heli laayahay saaxiib wanaagsan. Ha niyad jabin Boqore oo raadi saaxiib wanaagsan waad heliye. Waxaad ogaataa in wax kastoo wanaagsan dhayal lagu helin. Waxaad xasuusataa in ninkii la odhanayay "Thomas Adison" inuu 999 oo jeer ku fashilmay inuu laydhka soo saaro laakiin uu aakhirikii



Qoraalka Qoyska

Sheeko



Waxa la sheegay inuu jiray nin, kaas ooy haysatay dhibatooyin faro badan dhan walba un awaayay xal, wuxuu go'aan ku gaadhay inuu u tago waayo

arag ama odoyaasha da'da weyn leh ee waayeelka ah taasoo suuro gal tahay inuu siiyo xal, Kadib markuuu tagay ayuu ku yidhi.

NINKII : waxaan kuugu imid inaad xal isiiso oonad iga caawiso dhibaataada iyo hamigan aan ku jio?

ODAYGII : isagoo wajigii ninka aad ugu fiirsanaya ayuu wayiiyay labo su'aalood.

1. Dhibaatooyinka mala timiday dunida adoo wata?

NINKII : may walaahi

2. Aduunkaan maad ka tagi adoo wata dhibtooyinkan?

NINKII : may walaahi

ODAYGII : shay aanad la iman, aanadna la soconay na yuuna kaa qaadanwaxaas oo fikir iyo hami ah noqona qof u sabra dhib walba, hana kala bataan wakhtiga aad samada eegaysid ama ilaahay baryayasid iyo intaad dhulk eegaysid waxaad heli wax walbee.

Wuu ka tagay nnkii isagoo faraxsan dhibtii haysatayna iloobay isagoo maskaxdiisu soo celcelinayso "SHAY AAND LA IMAN DUNIDA KORKEEDA ANAD LA SOCONAYN OONAD IILKA LA TAGAYN WAXAAS O HAMI AH

IILKA LA TAGAYN WAXAAS O HAMI AH YUUNNA KAA QAADAN "


Shaafici ayaa idhi

دع الايام تفعل ما تشاء وظب نفسا ادا
حكم القضاء ولا تجزع لحادثة الليالي فما
لحوادث الدنيا بغاء

Wuxuuna ku qancay taladii ama xalkii odaygan maskaxda badan leh, ma jiro aduunkaan wax ayar ama wax wayn ilaa ay xal leyihiin xitaa haayna gacmaheena ku jirin xalku waxay ku jirtaa gacmaha ilaahay kaasoo wax walba qadaray.

Waxaa Qortay:
Hibo Cumar Axmad

Qiimaha Ay Leedahay Hooyadu



Qiimaha ay hooyo kasta leedahay ayaa ah mid aan lagu soo koobi karin maqaal iyo wixii la mid ah, waxaan dhamaanteen ogsoonahay in naxariista dhabta ah iyo jaceelka aan shuruuda ku xirneen laga heli karo hooyo oo kaliya, dhaqan kasta iyo diin kasta waxaa lagu amaanaa hooyada, mana jirto umad aan ixtiraam iyo qadarin u hayn hooyada, waa arin dabiici ah in aan qalbiyadeena ka dareeno hilow iyo jaceel aan qiyaas lahayn marwalba oo aan hooyo xasuusano. qalbiyadeena ka dareeno hilow iyo jaceel aan qiyaas lahayn marwalba oo aan hooyo xasuusano, sidi ay ku noqon lahayd hooyo guda ta waajibkeeda. Maqaalkan kooban wuxuu si gaar ah u

lafa guri doona hooyadii hore iyo kuwa maanta, markasta waxaa sharaf mudan hooyooyinka oo dhan xili kasta oo ay joogaan, waxaan ku dhaqsanaynaa in aan wax ka sheegno sida ay u fakari jirtay hooyadii hore, arinta ugu muhiimsan ee aan ka xusi karno hooyadii hore ayaa ah in ay ku dadaali jirtay sidii ay u barbaarin lahayd ubad mustaqbalka anfaca, nolosha oo dhan waxay ka lahayd hal u jeedo oo kaliya taas ah sidii ay u korin lahayd ilmaheeda, ma aysan jirin wax kale oo ay ku mashquulsaneed, sidoo kale ma ay dhici jirin in ay garan waydo waajibka ka saaran ilmaheeda, guud ahaan bulshadii hore ayaa waxay qiimo wayn u haysay hooyada, inan kastana waxaa loo carbin jiray. Hooyooyinkii hore waxay barbaariyeen fac dhan walba ka dhisan, marna ma aysan dhici jirin in ubadku ay heli waayaan daryeelkii ay xaq u lahaayeen, hooyadii hore waxay lahayd dareen fog oo ku qotoma mustaqbalka, daruuf walba iyo xaalad kasta oo timaada waxay ku wajihi jirtay dareen hooyanimada ayadoo markasta u daneenaysa ilmaheeda, si kasta oo ay u waydo waxa ay rabto waxay

ku samri jirtay korinta ilmaheeda, ubadkii hore waxay nasiib u yeesheen in ay helaan hooyo ka korisa maskaxda iyo jirka waana taas sababta dadkii hore ay uga dadnimo wanaagsanyihiin kuwa maanta jooga, hooyadii hore waxay lahayd dhaqan hooyanimada oo ku salaysan dhaqan soo jireen ah oo ay ka dhaxashay hooyadeed, wanaagii hooyadii hore ayaa keentay in la helo bulsho kala danbeesa oo qof kasta uu leeyahay waajibbaad iyo xuquuq. Marka la fiiriyo nolosha casriga ah waxaa ku soo baxaya in ay sii dhimanayso kartidii iyo dadaalkii lagu yaqiinay guud ahaan hooyada, soomalida oo ah bulso mardhow si siloon u ilbaxday ayaa waxaa ku soo food leh mustaqbal mugdi ah marka la fiiriyo sida ay u dhaqanto hooyada cusub, waxaa wax aad looga naxo ah in hooyada maanta ay aad uga fikarto nafteda oo kaliya halkii ay ka fakari lahayd mustaqbalka ubadkeeda. Inkastoo hooyada ay marwalba ka naxariis bantahay aabaha hadana waxaa batay hooyooyin aan marna fahamsanayn qiimaha hooyanimada,

hooyada maanta joogta waxay wax ka fiirisaa meel aad u dhow halka hooyadii hore hankeedu ahaa mustaqbal iyo aayotiin wacan, waana taas sababta aan u arkeeno maalin walba hooyo kaga mashquulaysa barbaarinta ubadkeeda wax aan dan u a ahayn. waa taa wanagfiicnidaa hoyadii hore ay lahayeed iyo xagwalba aye uga fikiraysaye ubadka koritiisa xa maskaxda iyo jidhka-ba, xaga hooyada danbe ee waliba cusub ugafikirto nafteda qudha iloodayna qoyskii iyo ubdaka barbaarintodi, waxaan urajaynayaa in hooyoonka imika aynoqdaan hoyenkii hore (ishala) waxankusoo khatimidoonaa gabaye kusahasann wannaga hooyada, waa tan.

Waa Qalinkii :
Raxma Cabdinaasir
X.Axmad Miisaan



Hadaf ma leedahay?

Ugu horayn waxa muhim ah in uu qof kasta oo inaga mid ahi fahmo HADAFKU muxuu yahay? Qofkastaa ma u baahanyahay inuu hadaf yeesho? Shuruuudee se ku xidhan inuu qofku hadafkiisa gaadho? Maxaase u suuro galin kara inuu gaadho hadafkiisa? Hadafku waa qimada qofka. Waa meel uu ku hamiyo ama ku himiloodo qofi. Wa rabitaanka iyo jamashada qofi janto inu gaadho meel uu ku hamiyay ama uu helo shay u imbadan ku rajo wayna. Hadafku waa shayga dhadhan u yeela nolosha, waa dhiirigaliyaha nololeed ee uu qofi yeelan karo, Hadafku wa qurxiyaha iyo macaaneeyaha nolosha. Waxa lagama maarmaar ah inuu uu qofku Hadaf iyo Himilo yeesho inta uu nool yahay. Hadaba Noloshu qiimo iyo dhadhan ma leh hadaanu qofku hadaf iyo himilo lahayn. Hadafku waa shayga macno u yeela nolosha qofka bila'aadamkaa. Hadaf la'aani waa habacsanaan iyo hanti la'aan. Qofku hadaanu himiloon ama damac yeelan waa qof u nool sida xoolaha. Waxa xaqiiqo ah in dadku kala hadaf duwanaadaan. Waxa jirta in ay dadku ku kala duwan yihiin dajinta iyo waliba xaqiijinta ahdaaftooda. Hadaba su-aashu waxay tahay: qof waliba ma gaadhaa hadafkiisa? Jawaabtu waa HAA lakin shuruuda ku xi-

dhan ayaa ah mida go'aan ka gaadhi karta in hadafkan lagu hamiyay uu suuro gali karo iyo in kale. Qofku waa inuu xamaasad iyo rabitaan Xad dhaaf ah u yeesha shayga uu rabo inuu helo. Rabitaanka iyo xamaasadana waxa Jiho u yeela Hadafka. Waxase wax lala yaabo ah hadii aad dadka badan kooda waydiiso Hadafka iyo qaayada ay ka leeyihiin noloshooda ama riyada ay doonayaan inay xaqiijiyaan inay kuugu jawaabaan ja-waabo aad ka dhadhansanayso jileec iyo caajis. Waxay kugu jawabayaan: "waxan doonayaa inaan guulaysto" waxan raba inan si farxad leh u nolado" "waxan donayaa inaan ku raaxaysto nolosha".. dhamaan ja-waabanahi waa kuwo riyo ah waxayna tusale cad u yihiin suurto gal la'aan iyo xaqiiqoobid la'aanta hadafka. Qofka inuu guulaysto rabaa qaybtee ama dhinecee ayuu doonaya inuu nolosha kaga guulaysto? Qofka farxad damacsan inuuku noolaada ma ka fikiray wixi sababi laha farxa-diisa? Qofkanse doonaya inuu nolosha ku raaxaystaa sidee iyo muxuu ku heli kara raaxada noloshiisa? Waxa halkaa ka muuqata in hadafka iyo himilada qofku inay u baahantahay arimo dhawr ah:- Marka ugu horaysa ee uu qofku rabo inuu hadaf dajisto waa inuu qoraa. Qoraalka hadafkaagu wuxu xasuusin iyo dhiiri-

galin u yahay naftaada. Cabdi silimoo Waakii lahaa "Wixii laqoraa quruumo hadhee muxu hadal qiimo leeyahay". takale waa inu qofku ku xisaabtamaa hadafku inuu noqdo mid cayiman isla markaana Go'an. hadafku wa inuu noqdaa mid ay macquul tahay in la gaadhi karo oon ka baxsanayn sunada nolosha iyo suurto gal ahaanshaha dabiiciga ah. Waa in la cabiri karaa hadafka iyadoo kolba laga qiyaas qaadanayo xadiga rabitaan ee qofka hadafka lihi uu leeyahay. Hadafku wa inuu yeesha wakhti uu bilaabmo iyo wakhti uu dhamaado. wa inuu yahay mid xaqiiqo ah isla markaana uu caqliga bini aadamku aqbali karo. Wa inuu noqdaa mid dhab iyo xaqiiq iyo run intaba ah. Bal sawiro ma raaci lahyd Bajaaj adoon u qasdiyin inaad tagto meel kuu cayiman? Hadaba maxay dadka ba-dankoodu u nool yihiin iyaga oon hadaf iyo himilo ka lahayn noloshoodu?.Nolosha bilaa hadafka ahi waa sida dhagax aad tuurtay adoon ula qasdiyin meelnaba. Waxa dhacda in ay mar mar ku adkaato qofka inu xaqiijiyo hadafkiisa isagoo dhamaan buuxiyay

Qofkaasi waxa u banaan inuu isticmaalo dariiqad ka duwan dariiqadii hore ee uu rabay inu ku xaqiyo hadafkiisa. Waxa uu badali kara tashkiilada hore ee ay ugu suro gali wayday xaqiijinta hadafkiisu. Ogowna shayna lagu ma helo dhayal ama sahal. Ku xisaabtan shay walba ood dubaaqaaga galisa wuxu u baahan yahay dadaalkiisa iyo tamartiisa uu u qalmo si aad u hesho. Waa kii gabayaagii lahaa "sahal laguma helo wadaadow waxan cid ku hawshoone". Hadaba maxaa sababa in ay qofka u suuro gali waydo xaqiijinta iyo rumaynta riyadiisu. Waxa sababa arimo dhawr ah:- Inuu hadafku ka baxo oo uu waayo shuruudaha aan kor ku so xusnay. In hadafku uu waayo dadaalkii uu u qalmayay si loo gaadho amaba lagu bixin wayo tamarta iyo u socodka uu ku suuro gali lahaa. Iyo waliba inuu hadafku noqdo mid lagu riyooday kaliya. Dhaman arimahani waxay sabab u yihiin fashilmida hadafka!! Hadaba Hadaf hadii aad leedahay, u socdaal u dadaal u xamaasadoo una bixi waxkasta si aad u gaadho Una xaqiijiso Himada iyo himilada naftaada. Dhimo adiguu xaqiijiyay riyooyinkaagii ama ku dhimo aduu ku sugan dariiqoogi.. Dareen fiicanaa oo farxad badana hadaf lagu hamiyay oo waliba la gaadhay!!!

HIMILO

NEWS LETTER



Jawaabaha Hal Xidhaalaha

- 1) Hurdada
- 2) Waa Xarafka (A)
- 3) Waa maqaska
- 4) Waa miisaanka
- 5) Waa sanko
- 6) Waa qaraha
- 7) Waa bada
- 8) Waa nakaadafada
- 9) Waa jaamacada carabta
- 10) Waa salaada jimcaha

Murti Iyo Maahmaah

Hal-leey:

- 1- mar I dage alaha dago, mar labaad idagase aniga is degay.
- 2- xeyn yare sabool bey eeday xididna warbuu eeday
- 3- hashu mannkeyga gadaye ma masaarbey liqday.
- 4- dharigii fara badiyaa wuu fuud xaraareeyaa.
- 5- nimaan kuu furi doonin yuusan kuu rarin.

Labaaleey:

- 1- Labo ayaa rag lagu maamulaa.
- cududoo la isku keen iyo calaf-kooda oo la kala dhowro.
- 2- labo wax ma bartaan -
- qofka kibirka badan iyo qofka xishood ka badan 3-
- taladu waa labo -
- mar aad garan weydo iyo mar aad gaare weydo.
- Sadexley
- Sadex baa rag ugu liita
- Nin maqan oo aan latabin nin jooga oo aan la tiring nin tagey oo aan la celin
- 2- Sadex ilaahay baa kugu neceb
- Slaad La'aan Soon La'aan Sa-daqa La'aan

Halxidhaale

Waxaad sheegtaa, wax aad manta oo dhan sugaysay, oo markii uu ku yimaadana aadan arkeyn?

2-waxaad sheegtaa hal qorax ku jirta labana dayax kaga jirta?

3- waa maxay waxa aan wax qaniinin waxna goynin ilaa indha-ha faraha laga galiyo

4- waxaad sheegtaa garsoore caadila wuxuu leeyahay laba caal-calood farina ma laha xukunkiisa dadka oo dhami raali ayey ka yihiin carrabna ma laha hadaba waa kee garsoorahaasi?

5- waxaad sheegtaa wax korka hilib ku leh hoosna timo ku leh?

6- waxaad sheegaa guri labo dabaq ah oo dabaqa kore uu cagaaryehay dabaqa hoosena uu guduud yahay dad madowna ay ku nool yihiin

7- waxaad sheegtaa wax markabna qaadi kara musbaarna celin karin ?

8- sheeg qofka aad dadka ugu jeceshahay oo aadan la hadli karin hadii aad la hadashana aad qof waaalan noqonayso?

9- sheeg jaamacad adduunka oo dhan laga aqqonsanyahay oo aan hadana arday dhiganin?

10- sheeg wax haddii aad ku soo gaarto aad lao ka haleysa had-dii ay kaa dhmaadaana aad afar ka helayso?

Sheekooyin

1) IMMISA SHINBIR?

Macallin xisaabta dhiga ayaa ardadiisa mid ka mid ah uu ka daalay sidii uu u fahamsiin lahaa kalagoynta.

Haddaba wuxuu isku dayay in uu tusaale u soo qaato shinbir meel joogta.

Macallinkii wuxuu ku yiri ardeygii: Cali dhageyso haddii shan shinbir oo geed saaran mid ka disho immisa ayaa soo hareysa? Cali wuxuu ku ja-waabay hal. Macallinkii oo xanaaqsan ayaa yiri: Cali waad qaldantahay af-far ayaa soo hareysa.

Cali ayaa isagana ku jawaabay macallin adigaa qaldan affar wey duulayaan. Halka shinbir ee aad dishay oo kelya ayaa soo hareysaa!

2) ISKA DHAADHICI:

Nin baa maalin dhakhtar u tegey isagoo u sheegay dhakhtarka inuu xanuunsanayo. Dhakhtarkii ayaa ninkii baritaan ku sameeyey su'aalana weydiiyey si uu u ogaado inuu ninkan cudurka haya iyo noociisa uu bal helo. Dhakhtarkiise wuxuuna dar-eemay in ninkan uu hayo wax la yiraa cuqdad nafsi ee uusan cudur kale hayn.

Wuxuuna dhakhtarkii ninkii ku yiri "Waxaan kugula talinayaa inaad iska dhaadhici-sid inaad xanuunsanayn markaas ayaad bogsan doontaa." Ninkii ayaa yiri "Waahagaag dhakhtarooow", oo inuu tago isku dayey, markaas baa dhakhtarii yiri "Warninyahow lacagtii baadhitaanka isii". Ninkii baa yiri "Dhakhtarooow, adiguna iska dhaadhici inaan lacagtii ku siiyey.

Salaama Ka dheh:.....